

TALLAALKA

Qaado mudditaankaaga si aad caafimaad ugu joogto

Tallaaladu waa mudditaanka kaa caawiya in aanad bukoon


SABABTEE AYAAN UGU BAAHANAHAY TALLAALKA?

Dalka Maraykanka, cuduro badan oo ay dadku ku bukoon jireen mar hadda waa ay ka tageen. Mid ka mid ah sababaha ugu muhiimsan waa isticmaalka tallaalka. Tallaalka waxa uu caawiyaa in laga hortago cudurka loo gudbin karo qof ilaa qof kale. Markaad hesho mudditaanka aad u baahantahay, waxaad naftaada ka ilaalisa iyo kuwa aad jeceshahayba in ay bukoodaan.

SIDEE AYAY TALLAALKU U SHAQEYYAAN?

Tallaalka waxaa laga sameeyee fayras la mid ah (sidoo kale loogu yeedho jeermis) kaas oo sababa cudurka, jeermiska loo isticmaalo in laga sameeyo tallaalka mid uun wuu "dhintay" ama waa "daciif". Kuma bukoon doontid, waxay ka caawin doontaa in jidhkaagu la dagaalamo jeermiska iyo cudurka ay sababaaan.

KUMAA U BAAHAN TALLAALKA?




MA JIRTAA SAAMAYN TABBAN?

Dadka qaar waxay yeeshaan saamayn tabban oo yar ka dib markay qaataan mudditaankooda. Tani waxay ku tagtaa maalin ama labba.



Xanuun/Casaan Finan Yar yar Xumad Degen

Dadka qaar waxay leeyihiin mid dhif ah, oo saamayn tabban oo xun ah ka dib markay qaataan mudditaankooda. Wakhtiyada badankooda, waxay dhici doontaa dhowr miridh ama dhowr saacadood ka dib markay qaataan mudditaanka.



Adkaansho Neefsashada ah Dareemaya Dawakh Finan/Cun cun Barar Hunguriga ah

TALLAALADEE AYAAN U BAAHANAHAY?

Shaxda dhinaca kale waxa ay muujinaysaa nooca mudditaanka dadka waa wayn iyo carruurto u baahantahay. Dadka waa way nee aan qaadan dhammaan mudditaanada markay carruur ahaayeen waxay u baahan doonaa mudditaan dheeraad ah. La hadal dhakhtarkaaga si aad u ogaato kuwa ay yihiin mudditaanka aad u baahantahay.

Macluumaadka dheeraadka ah, booqo: www.vaccines.gov

Magaca dhakhtarkayga:

Lambarka telefoonka dhakhtarkayga:

Qaado mudditaankaaga si aad caafimaad ugu joogto

Ka arag dhakhtarkaaga baadhitaankaaga oo ka hel mudditaano cusub ee aad u baahantahay.

Ka arag dhakhtarkaaga baadhitaankaaga oo ka hel mudditaano cusub ee aad u baahantahay: _____

(Magaca)

(Da'da)

Booqashadaada xigtaa waa: _____
(Taariikhda)

(Wakhtiga)

(gelinka hore/gelinka dambe) _____
(Taariikhda dhalashada)

Maxaa loogu yeedhaa?	Kumaa u baahan?			Cudurkee ayay mudditaanku caawiyaan ka hortagooda?	Cudurku muxuu sababaa?
	Carruurta* Keliya	Carruuta & Dadka waa wayn	Dadka waa wayn Keliya		
<input type="checkbox"/> DTaP ama Td/Tdap		X		Gowracatada	Qandho, hunguri xanuun, dareemida itaal dara; waxay keeni kartaa waxyeelada wadnaha iyo neerfaha
				Teetanada	Qandho, adkaanshaha qoorta, wakhtiga adaga ee wax liqida; waxay keeni karaan wakhtiga adag ee neefsashada
				Kixda	Qufaa daran, sanku duufka leh, hakadka neefsashada ilmaha yar; waxa uu keeni karaa caabuqa sambabka
<input type="checkbox"/> Flu		X		Hargab	Qandho, hunguri xanuun, qufac, xanuunka muruqa, waxa uu keeni karaa caabuqa sambabka
<input type="checkbox"/> HepA		X		Jooniska A	Dareemaya daal, indho jaale ah iyo maqaarka, waxay keeni karaan cudurada beerka, kelyaha, iyo dhiiga
<input type="checkbox"/> HepB		X		Jooniska B	Dareemaya daal, indho jaale ah iyo maqaarka; waxay keeni karaan waxyeelada beerka
<input type="checkbox"/> Hib		X		Bakteeriya keenta Cuduro badan	Waxay keeni karaa caabuqa sambabada iyo xuubka ku meersan maskaxda iyo xangulaha.
<input type="checkbox"/> HPV		X		Fayraska keena burrooyinka ilaa kansarka	Burooyinka xubinta taranka; waxay keeni karaan noocyo kala duwan oo kansarka ah
<input type="checkbox"/> IPV	X			Dabaysha	Hunguri xanuun, qandho, iyo madax xanuun; waxay keeni karaan jidhka oo awooda inuu dhaqaaqo
<input type="checkbox"/> MCV4		X		Cudurka maningokal	Qandho kedis ah iyo qoorta oo adkaada; waxay keeni karaan caabuqa xuubka ku meersan maskaxda iyo xangulaha.
<input type="checkbox"/> MMR		X		Jadeeco	Qandho, finan, san duuf leh, qufac, indho basali ah, waxay keeni karaan caabuqa sambabka
				Qanjo barar	Qandho, madax xanuun, iyo liqida qanjidhada sameeya caabuqa, waxay keeni karaan caabuqa xuubka ku meersan maskaxda iyo xangulaha.
				Jadeeco Jarmal	Xumad, qanjo barar, iyo finan
<input type="checkbox"/> PCV		X		Oof	Caabuqa sambabada
<input type="checkbox"/> RV		X		Cudurka shubanka carruurta	Xumad, matag iyo shuban
<input type="checkbox"/> Tallaalka hablabaasta	X			Habla baas	Qandho iyo finan cuncun leh
<input type="checkbox"/> Tallaalka finanka			X	Xanuun leh finan badan	Finan xanuun leh oo dheecaan leh

*Da'da carruurta 0 ilaa 18

Ku ilaali adiga iyo kuwaad jeceshahayba caafimaad. Hel mudditaankaaga.